



**Qaabka sharciga dembiyada ee dalka Maraykanka** wuu ka duwan yahay dalalka kale badankooda. Halkan waxa ku qoran su'aalo iyo jawaabo kaa caawiya sin aad u fahamto qaabka uu ugu shaqeeyo rdalka maraykanka iyo degmada Santa Clara County.



## **Waa kuwee hay'adaha dhawra ee dhaqan geliya sharciga degmada Santa Clara County?**

Toban qeybood oo Bolis ayaa ka jira magaaloyinka degmada Santa Clara County. Waxay kormeeraan xuduudda magaalo kasta. Goobaha aan ku tirsanayn magaalo waxa mas'uul ka ah qeybta ciidanka Sheriffka ee degmada Santa Clara County. Waaxda dhaqan toosinta ayaa maamusha xabisyada. Jidadka waaweyn waxa kormeera ciidanka wadooyinka ee la yiraahdo California Highway Patrol (CHP). Wakaaladda Socdaalka iyo Jinsiyadda INS ayaa xafiis ku leh magaalada San Jose, waxay leeyihiin awood xeer fulin iyo qolol ku meel gaar loogu hayo dadka.

## **Maxaan ila gudboon haddii dhib i gaaro ama aan arko dembi dhacaya?**

Haddii aad dhibani tahay iyo haddii aad argot fal dembiyeed, soo ogaysii boliska. Wac lamabrka 911.

## **Waa maxay xarigu (arrest)?**

Marka lagu xiro, xor u ma tihiin meesha lagagu

xiray inaad la tagto. Qaabka dembiilenimo waxay bilaabantaa marka eedeysanaha loo xiro dembi loo haysto inuu falay. Qof waxa xiri kara qof kale oo muwaadin ah, cid ka tirsan hay'adaha sharciga fuliya ama haddii loo adeegsado fasax xaakim bixiyay in lagu xiro. Fasaxa xaakimku si uu u noqdo meel mar waa innuu qeexayo suurto galnimada fal dembiyeed.

## **Waa maxay "suurto galnimadu?"**

Suurto galnimdu waxay tahay marka ay jirto xaqiiq marag u ah rumaysnanta sarkaalka ee ah in qofku galay dembiga.

## **Maxay tahay xuquuqdaydu marka lay xiro ama saldhig bolis la i geeyo?**

Haddii aad tahay qaan aar ah muwaadin ah ama aan ahayn, xuquuq ayaad leedahay marka lagu xiro. Inta uusan sarkaalka bolisku su'aalo ku weydiin, waa in uu kuu sheego arrimahan:

- In aad xaq u leedahay inaad aamusnaato.
- In wixii aad ku hadasho loo adeegsan doono eedayntaada.
- In xaq u leedahay in looyar kuu joogo marka su'aalaha lagu weydiinayo.
- Haddii aadan awoodin lacagta looyarka inay dawladdu mid kuu samaynayo.

Haddii qofku xuso xuquuqdiisa ah inuu helo looyar, markaas sarkaalku ma sii wadi karo su'aalaha. Haddii uu ku sii adkaysto sarkaalku su'aalaha, markaas waxa lagama maarmaan ah inaad looyar codisgagaa ku celcelisid. Inta badan sarkaalku wuu ka joogsaa in uu sii wado su'aalaha.

## **Maxa dhici kara marka maxkamadda la i geeyo?**

Marka lagu xaro ka dib waa lagu eedayn, oo xaakim ayaa lagu hor geyn, xaakimka ayaa si rasmi ah kuugu sheegi eedda lagu haysto. Markaas ayaad caddeyn inaad qabto eedda iyo inaad diido oo aad iska difaacayso oo dacwad lagu furo.



## Maxa dhici kara haddii aanan loyar lacagtiisa awoodin?

Waxa laga yaabaa inaad xaq u yeelato qareen ka tirsan difaaca dadweynaha. Ka codso xaakimka inuu kuu diro xafiiska difaaca dadweynaha (Public Defender's office).

## Ma codsan karaa turjumaan?

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu heli turjumaan, mar kasta oo dacwaddu meel adag ka marayso maxkamadda demiyada.

## Maxa dhici kara inta dacwaddu socoto?

Inta dacwaddu socoto eedaysanuhu waxa xaq uu u leeyahay loyar laga soo diro xaafiiska difaaca dadweynaha. Qareenka ka socda xaffika difaaca dadweynah waan looyar madax banaan oo ay hawshiisu tahay difaaca xuquuqda qofka eedaysan.

Haddii Xeer Ilaaliyaha degmadu ka baaqsado inuu caddeyo aan muran lahayn in eedaysanhu galay dembiga lagu haysto eedaysanaha, ama caddeyn in muran ku lahayn keeno eedaysanuhu in uusan gelin dambigaas, markaa maxkamadda dacwada way baabinaysa.

## Qof qoyskayga ka tirsan ayaa xabsi ku jira, markaa maxa ila gudboon?

DWaxay ku xiran tahay haddaba dembiga uu galay qofkaasi, waxa laga yaabaa inaad fursad u yeelato inaad damin lacageed ku soo furto ilaa iyo inta maxkamad laga soo taagayo. Xafiisyada bixiya Damiinka lacageed (Bail Bonds) waxa aad ka heli kartaa buuga telefoonka ee "yellow page."

## Sidee ayay u saamayn kartaa sharcigayga haddii la i xukumo?

Haddaba dhibta aad geysatay ayay ku xiran tahay, Haddii xukun kgu dhaco waxa la arkaa inay sharciga aad ku joogto dalka wax u dhinto., sida inay kaa hor joogsanto siinta jinsiyadda, amaba dib lagu celiyo.

## Boliska ma laaluushi karaa?

Laluush ama lacag aad boliska ama kuwa kale ee fuliya sharciga siisid kaama hor joogsan karto in lagu xiro laguna xukumo. Waa sharci darro arrintaasi, waxaa laga yaabaa inay dhib kale kuu keento.



### Asian American Recovery Services ("The Place")

1370 Tully Road, Suite 501, San Jose, CA 95122

Tel: (409) 271-3900

Toll free: 1(800) 770-5674

Luqadaha: Cambodian, Ilocano, Tagalog iyo Vietnamese.

Adeegyada: Carruurta dugusiga hoose ayay ka ilaalisaa barasha alkolka iyo durrogada, barnaamijyo dhalinta ah, talo siin iyo kaalmayn qoyska ah. Daryeel dhalinta isticmaasha maan dooriyaha.

### Correctional Center for Women

701 South Abel Street, Milpitas, CA 95036

Tel: (408) 957-5414

Luqadaha: Spanish iyo Vietnamese

Adeegyada: Xarun dhaqan toosin. Correctional Center

### County of Santa Clara/Department of Corrections-Automated Victim Notification Service

Toll free: (800) 464-3568

Adeegyada: Dhibanayaasha dembi ayaa gali kara xarumaha ayagoon is muujin, dhibanaha muddo 15 beri gudahood ayaa lagu war cegelin inuu bixi doonolin, marka ay bixida la gaarana waa la sii deyn.



# Maxa Dhici Kara Marka lagu Xiro?

Tel: (408) 235-2202

## **Crime Victims United-Sacramento**

Tel: (916) 448-3291

Adeeyada: U doodis, taclin iyo taageero siyaasadeed qofka lagu xad gudbay. Waxay taageeraan kuwa xuquuq u dooda.

## **Elmwood Men's Facility**

701 South Abel Street, Milpitas, CA 95036

Tel: (408) 957-5820

Luqadaha: Spanish iyo Vietnamese

Adeegyada: meelo raggu isticmaalo.

## **Friends Outside**

501 Stockton Avenue, San Jose, CA 95126

Tel: (408) 295-6033

Luqadaha: Spanish.

Adeegyada: Adeeg qoyska laga xiran yahay, cunto siin xaaladda degdeg ah, Dhar iyo baahida guriga. Talo siin, kooxo kaalmo, casharo waalidka, xarumo qoys xagaaga, gargaar Krismaska, iyo barnaamijyo door ah oo xabisiyada iyo xarumaha dhaqan celinta la siiyo.

## **Probation Department of Santa Clara County - Palo Alto**

270 Grant Avenue, Palo Alto, CA 94306

Tel: (650) 327-1470

Luqadaha: Spanish, Vietnamese, iyo turjumaano luqado kale..

Services: Probation department.

## **Probation Department of Santa Clara County - San Jose**

260 North First Street, San Jose, CA 95134

Luqadaha: Spanish, Vietnamese iyo turjumaano luqado kale.

Adeegyada: Qeybta Fursad siinta da'yarta.

## **Public Defender's Office**

120 Mission Street, San Jose, CA 95110

Tel: (408) 299-7700

270 Grant Avenue, Palo Alto, CA 94306

Tel: (650) 327-1354

Adeegyada: Waxay difaacan dadka dembiyada fudud ama culus loo haysto iyo dacwadaha da'yarta loo haysto, kuwa aan awood u lahayn in ay bixiyaan lacagta looyarka. Kuwa laga yaabo inay maskaxda wax uga dhiman yihiin.

## **Santa Clara County Main Jail – North Jail**

150 West Hedding Street, San Jose, CA 95110

Tel: (408) 299-3689

Luqadaha: Spanish iyo Vietnamese

## **Volunteers in Parole**

118 W. Taylor Street, San Jose, CA 95110

Tel: (408) 277-1008

Luqadaha: Spanish

Adeegyada: Waxay isu raadiyaan looyar iyo maxbuus cafis dalbanaya. Labada oo 4-8 saac ay kulan siiyaan bishiiba. Adeegyadooda waxa ka mid aqado siin sanadkii hal mar, baabuur dhaqis, tacliin iyo abaabul isboorti.

## **Wright Center**

298 Bernal Road, San Jose, CA 95119

Tel: (408) 227-8022

Luqadaha: Spanish

Adeegyada: Xarumo dhaqan celin da'da 12 – 18 sano wiilasha iyo gabdhaha jira. Maxkamadaha carruurta. Dadweynuhu toos u lama xiriiri kara.

